




Noocyada Dharka





Noocyada Dharka

Leveled

Grade 2

Week 1





Buuggan akhriska dheeriga waxaa maalgalisay hay'ada USAID. Waxaana si wada jir ah isaga kaashaday daabcayna hay'ada Save the Children, wasaarada waxbarashada heer federal iyo xafiiska waxbarashada DDSI.

2008 T.I.




The CC By license lets others distribute, *adjust*, and build upon this work, for free or commercially, as long as credit is given to the original creation. However, any changes from the original must be indicated.

For more info please refer: <https://creativecommons.org/licenses/>




Dharka aynu xidhano
waxay isugu jiraan
noocyo badan.




Dharka aynu xidhano
waxay isugu jiraan kuwa
raga iyo dumarka.

Dharka aan xidhano
waxaa ka mida ah.



Surwaal, shaadh, dirac,
goonno, macawis, kabo.



Xijaab, shalima, jaakad,
funaadad, garan iyo
buume ama nigis.



Dumarku waxay xidhaan
dirac, goono, shalmad iyo
xijaab.



Ragu waxay xidhaan
surwaal, shaadh, jaakad
iyo macawis.



Ardaydu waxay xidhaan
dhar u gaar ah.




Dharka aan xidhano
waxaan isticmalaa xilliyo
kala duwan.



Xilliyada qaboobaha
waxaan xidhanaa
dharka suufka ah sida,
funaanadaha.



Xiliyada kulul waxaan
xidhanaa dhar khafiifa
sida dharka fudfudud.



Maalmaha jimcaha waxaan xidhanaa dharka sida shuluga iyo koofiyadda.

